Xogta waalidiinta carruurta ku jira Junior Infants
(Ardayda Dugsiga Hoose)

Talaallada 4 in 1 iyo MMR

Talaalka 4 in 1

Waa maxay magaca talaalka 4 in 1?
Talaalka 4 in 1 waxaa loogu yeeraa Tetravac.

Waa maxay talaalka 4 in 1?
4 in 1 waa magaca talaalka ka hortaga gawracatada, dabaysha, teetanada iyo jix-dheerta (xiiqda). Dhammaan caabuqyadaan waa xanuunno daran oo keeni kara in isbitaal lagu dhigo mararka ugu daranna waa loo dhiman karaa.

Xanuunnada ay ka hortagaan	Calaamadaha Guud	Dhibaatooyinka ka Dhalan kara
Teetannada	Xanuunka daran ee murqaha	Convulsions (Fits) Daan qalalka Dhimasho
Gawracatada	Dhuun xanuun Wadna garaac saa'id ah	Dhibaatooyinka neefta Baralaati Fashilka wadnaha Dhimasho
Jix-dheerta (Xiiqda)	Qufac aan kala joogsi lahayn oo xiiq wata	Dhibaatooyinka neefta Fashilka wadnaha iyo sanbabada Dhimasho
Cudurka dabaysha	Qandho Madax-xanuun Matag	Baralaati Dhimasho

Yaa u baahan talaalka 4 in 1?
Cunugaaga waa in la siiyo talaallo ka difaacaaya xanuunadaan markuu jiro labo, afar iyo lix bilood ayagoo qayb ka ah 6 talaal ee 1 ka isku ah.

Si loo kordhiyo nidaamka difaaca ee cunugaaga loona siiyo difaac dheeri ah oo ka dhan ah xanuunadaan, kuuro kale ayaa lagu talinayaa in la siiyo markuu Xoogaa Kobco.

Ma jiraan carruur ay tahay inaysan qaadan talaalka 4 in 1?
Waxaa jira carruur dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka 4 in 1. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday talaalkii hore ama wax kamid ah

talaal ama uu xasaasiyad daran ka qaaday daawooyinka anti-biyootiga ah ee polymyxin B, streptomycin iyo neomycin.

Waa inaad dib u dhigtaa qaadashada talaalka 4 in 1 haddii cunugaagu:
• uu qabo qandho aad u saraysa.

Talaalka 4 in 1 ma leeyahay wax dhibaatooyin ah?
Inta badan carruutu ma dareemaan wax cilad ah kadib talaalkaan.

Ciladaha ugu badan ee ka dhasha talaalka waa xanuunka, gaduudashada ama bararka gacanta. Marar dhif ah bararka gacanta ayaa u dhexayn gara garabka ilaa suxulka. Arintaan ayaa badanaa dhacda 2 maalmood gudahood kadib talaalka wayna ka ba'ayaan 4-5 maalmood gudahood. Anti-bayootigyada ayaan loo baahnayn si loo daaweeyo xasaasiyada daawada ka dhalata. Waxaad siin kartaa baristamool ama imbaroofiin. Waa inaad soo kale siisaa biyo badan. Xaqiiji inaan cunugaagu aad u diiranayn iyo inaan dharku xoqayn meesha cirbada looga muday.

Marar dhif ah carruurta ayaa dareemi kara qandho ama madax xanuun, ama xanuunsan kara.

Talaalka MMR

Waa maxay magaca talaalka MMR?
Magaca talaalka MMR waa midkood Priorix ama MMRVaxPro.

Waa maxay talaalka MMR?
Talaalka MMR wuxuu ka difaacayaa cunugaaga xanuunnada jadeecada, qaamoow-qashiirka iyo rubella (oo sidoo kale loogu yeero jadeecada Jarmalka).

Jadeecada, qaamoow-qashiirka iyo rubella waxaa keena fayrasyo waana xanuunno aad u faafiya caabuqa. Waxay faafaan marka fayrasku kasoo baxo qof qaba xanuunka uuna gaarsiiyo qof aan horay u qaadan talaalka cabauqa.

Xanuunnada ay ka hortagaan	Calaamadaha Guud	Dhibaatooyinka ka Dhalan kara
Measles	Qandho Finan Indhaha oo casaada ama xanuun badan	Encephalitis (bararka maskaxda) Kolba aariyo Bronchitis Caabuqa dhagaha
Qaamoow-qashiirka	Qanjiro barar aad u xanuun badan oo kaa haya daamanka hoostooda iyo qandho	Caabuqa maskaxda (Meningitis) Dhago beel Xanuun, barar ka fuula xiniyaha ragga waawayn
Rubella (Jadeecada Jarmalka)	Qandho iyo faruurac	Haddii hooyadu qaado caabuqa rubella, ilmaheeda ayaa qaadi kara dhibaatooyin waawayn oo dhalmada la xariira ayna ku jiraan indho beel, cilad dhanka maskaxda ah, dhago beel

Qofkee u baahan talaalka MMR?

Cunugaaga waa in la siiyaa talaalka MMR markuu gaaro 12 bilood jir. Carruurtu waa inay qaataan kuurada labaad Socod barad dhaafaan. Labo kuuro oo kamid ah talaalka MMR ayaa la siin doonaa cunugaaga si uu u helo difaaca ugu sareeya.
Haddii uusan cunugaagu waligii qaadan talaalka MMR hadda kahor, waa inuu qaataa kuurada labaad 1 bil kadib kuurada koobaad.

Ma jiraan carruur ay tahay inaysan qaadan talaalka MMR?

Waxaa jira carruur dhawr ah oo ay tahay inaysan qaadan talaalka MMR. Cunugaagu waa inuusan qaadan talaalka haddii uu xasaasiyad xun (anaphylaxis) ka qaaday talaalkii MMR ee hore, wax kamid ah talaalka ama maadada neomycin ama gelatin oo ku jirta talaalka MMR.

Waa inaad dib u dhigtaa qaadashada talaalka MMR haddii cunugaagu:
• uu qabo qandho aad u saraysa
• uu qaato kuurada badan ee daawada corticosteroids
• uu ku jiro daawayn sida daawada kansarka ama shoocaaca loo adeegsado
• uu qabo xanuun ama cudur saamaynaaya difaaciisa jirka.

Ma jiraa xariir u dhexeeya talaalka MMR iyo autismka?

Maya. Cilmi baaris ayaa muujisay inaysan wax xariir ah ka dhexayn talaalka MMR iyo autismka.

Talaalka MMR ma leeyahay wax dhibaatooyin ah?

Inta badan carruutu ma dareemaan wax cilad ah kadib talaalkaan. Ciladaha ka dhalan kara ayaa aad ugu yar kadib kuurada 2aad ee talaalka MMR.

Carruurta qaar ayaa qabi kara xanuunka, bararka iyo gaduudashada meesha cirbada looga muday. Marar dhif ah ayay carruurtu qaadi karaa “jadeeco yar” oo leh faruurac iyo qandho 6 ilaa 10 maalmood kadib. Carruurta ayaa qaadi kara “qaamoow-qashiir yar” ayadoo uu bararaayo qanjirka daanka asbuuca sadexaad kadib talaalka. Kuwaani maaha xanuunno faafaya.

Talaallada 4 in 1 iyo MMR ayaa la baxshaa isku maalin cunugaaga ayaana hal talaal looga dhufanayaa gacan kasta.

Cunugaaga ayaa u baahan in laga difaaco 7 xanuun ee faafa marka uu bilaabo dugsiga.

Cunugaaga ayaa horay u qaatay talaallada si looga difaaco xanuunka gawracatada, dabaysha, teeanada, jix-dheerta, jadeecada, qaamoow-qashiirka iyo rubella markuu ilmo yar yahay. Difaac laga helo xanuunadaan ayaa hoos u dhacaysa muddo kadib marka kuuro xoojin ah ayaa lagu talinayaa hadda si uu u helo difaac dheeri ah.

Nidaamka difaaca ee cunugaaga ayaa si fudud ula falgali kara talaaladaan. Talaaladaan iskumar ayaa la siiyaa cunugaaga si uu u helo difaaca ugu fiican ee ka dhanka ah xanuunadaan.

Sidee ayaad talaaladaan ugu helaysaa cunugaaga?

Talaaladaan waxay qayb ka yihiin barnaamijka talaalka dugsiga ee HSE. Waxaad heli doontaa faahfaahin iyo foomka ogolaanshaha kahor intaan cunugaaga la talaalin.

Deegaannada Donegal, Sligo iyo Leitrim talaaladaan waxaa ku siinaaya dhakhtarkaaga guud. Degmooyinkaan waxaad helaysaa waraaq kaaga imaanaysa HSE oo kaa codsanaysa inaad u tagto dhakhtarkaaga guud marka la gaaro xiliga talaallada.

Cunugaygu ma qaadan karaa talaalka COVID-19 iyo talaallada kale?

Si loo feejignaado, waxaa lagu talinayaa in carruurta ku jira kooxda da'daan, loo kala fogeeyo talaalka COVID-19 iyo talaallo kasta oo kale muddo 14 maalmood ah.

Sidee ayuu cunugaagu ugu diyaar garoobayaa maalinta talaalka?

Maalinta talaalka, cunugaagu waa inuu:

- Quraac cunaa

- Waa inuu xidhaa shaar dabacsan oo gacmo gaab ah
- U keen cadayntiisa talaalka dugsiga, haddii ay macquul tahay.

Maxaa dhacaaya haddii cunugaagu uusan imaan maalinta talaalka ee dugsiga?

Cunugaaga ayaa wali heli kara talaalka. HSE ayaa u diyaarin doonta cunugaaga in lagu talaallo rugta HSE ama waxa alagaa codsan karaa inaad u gayso cunugaaga dhakhtarkaaga guud si loo talaallo.

Maxaa dhacaaya haddii cunugaaga u baahan yahay kuuro labaad oo talaalka MMR ah?

HSE ayaa u diyaarin doonta cunugaaga talaalka.

Foomka ogolaanshaha ee talaallada
Waxaad u baahan tahay inaad akhrido ama saxiixdo foomka ogolaanshaha oo ku jira baakadaan aadna ku celiso dugsiga si aad u xaqiijiso in cunugaagu talaallada ku qaato dugsiga.

Barnaamijka talaalka dugsiga ee HSE ayaa lagu samayn karaa goob kale ama dib ayaa loo dhigi karaa cudurka COVID-19 awgiis.

Xog dheeraad ah
Haddii aad qabto su'aalo fadlan kala hadal xubin kamid ah kooxdaada talaalka dugsiga ee HSE, kalkaalisadaada Caafimaadka Dadwaynaha ama dhakhtarkaaga guud.

Booqo webseedkeena **www.immunisation.ie** si aad u akhrido xog dheeraad ah oo ku saabsan xanuunadaan faafa iyo talaallada.

Waxaad sidoo kale heli kartaa lifaaqyada aad ka helayso waraaqaha xogta ee bukaanka oo ka hadlaaya talaallada barta **www.hpra.ie**. Ka raadi Tetravac (4 in 1), Priorix ama MMRVaxPro (MMR) si aad u akhrido waraaqda xogta bukaanka ee qusaysa.

Waraaqdaan xogta waxaa soo saaray: HSE National Immunisation Office (Xafiiska Talaallada Qaran ee HSE)
Taariikhda daabacaada: Juun 2022